

# QOF KASTAA WUU KA MID NOQON KARRA



16 maayo\* ayaa carruurta dugsiyada dhigata ee dunida oo dhan u dabaal daga doonaan No Litter Day. Carruurta, oo qeyb ka ah No Generation Generation, ayaa soo ururiyaan qashinka, kala saara oo miisaama. Isla markaana waxa ay baahiyaan macluumaadka ah in carruurto dhami ku noolaato bay'ad nadiif ah oo caafimaad qabta.

Halkan waxaan ku soo ururiney layliyo ardeyda ka caawinaaya inay sahmiyaan qashin qubista iyo xalalka loo baahan yahay si loo helo adduun ka nadiifsan oo ka sii waara.

## QASHINKA KA HADAL

**Ku bilow inaad** ardeyda tusto filimka No Litter (worldschildrensprize.org/nolittergeneration). Haddii aydaan haysan internet ayaad aadi kartaan talaabada xigta.

1. Koox ahaan iyo fasal ahaan ka wada hadla waxa filmiku ka hadlaayey. Weydii su'aalaha sida: Maxaad dareemaysaa kadib markaa filimka daawatey? Maxuu inoo sheegayaa? Maxaad ka fikiraysaa markaad aragto?
2. Su'aalaha: Miyeynu wax ka baran karnaa waxaynu hadda aragney? Waa maxay doorkeenu?
3. Waxaa laga yaabaa inaad filimka hal mar oo kale aad daawataan kadib markay ardaydu ka fikiraan wixii ay soo mareen.

U ogolow inay ardeydu akhrido qoraal xog ah oo ku sabsan qashinka iyo xashiishka. Baadhiyaan sameeya oo ka wada hadla waxyaabaha ku jira. Su'aalahan u isticmaal inay ku taageeraan.

- Waa maxay qashinka dhabta ahi? Miyaad bixin kartaa tusaale ku saabsan qashinka u caadiga ah ee meesha aad degan tihiin?
- Maxay qashin qubistu keeni kartaa? Sidee ayay u saameyn kartaa noolaha badda?
- Sidee ayay qashin qubistu inoo saameyn kartaa inaga bini'adamka?
- Waa sidee qashinka lagu qubey meesha aad ku nooshahay? Ma dhibaato weyn baa? Ma qashin badan ayaa dhulka daadsan?
- Miyuu meesha aad degan tahay jiraa nidaam wanaagsan oo lagu



maareeyo kala soocida qashinka.

- Sidee ayaa loo dhimi karaa qashin qubista meesha aad degan tahay? Waa maxay xalka aad arkeysaan?
- Sidee ayaa loo dhimi karaa qashin qubista dunida?

### HOOS U GUDO GALID

Ardeyda ayaa kaligood shaqeyn kara, laba laba u shaqeyn kara ama koox ahaan siday u keenaan xal ay soo jeediyaan. Sidee ayaa loo dhimi karaa qubista qashin meesha aad degan tihiin? Waa maxay xalka aad arkeysaan? Layliga waxa loo isticmaali karaa xataa su'aalaha kale. Sidan samee:

1. Kali ku bilow: Ardey kastaa waxa uu qorayaa waxa uu ka fikiraayo, ugu yaraan saddex qodob, dhowr daqiiqo gudahood.
2. U ogolow in ardeydu laba laba u fadhiiato: Laba qof oo kastaa waxay isku sheegayaan siday u fikirayaan iyagoo is barbar dhigaaya.
3. Laba qof + Laba qof: Laba qof iyo laba qof ayaa isla wadaagaaya fikradaha. Wadajir ayay kooxdu u dooranaysaa saddexda qodob ee ay rabaan inay fasalka u soo ban dhigaan.
4. Koox kastaa waxay fasalka u soo ban dhigaysaa fekerkooda iyo aaraadooda.
5. Ku soo gabogabee inaad ka feker-taan waxaad wadajir dugsiya ugu qaban kartaan si aad u ogaataan dhibaatooyinka qashinka iyo xalalka labadaba.

## QASHINKA HA FIDINE EREYGA FIDI

U ogolow inay ardayda No Litter Day u isticmaalaan si ay ugu faafiyaan aqoonta ku saabsan cawaaqibta qashinka qubista iyo dhiirigelinta ka qeyb galida. Doorro waxa idinku haboon fasal ama dugsi. Taasi waxay tusaale ahaan noqon kartaa:

- \* Inaad qorto oo aad qabato hadal ku sabsan cawaaqibta qashin qubista, iyo xalalka jira.
- \* In la qoro qoraal, taariikhda qorid, sheekooyin ama qoraalka filimada ama riwaayadaha.
- \* Laga sameeyo warbixin lagaga waramaayo, qosolqosol, cabsida ama riwaayadaha soo jiidasho abuurta.
- \* Sameeya oo ku soo bandhiga dugsiya riwaayad ama bandhig faneed. Ehelka, jaarka, siyaasiyiinta degaanka iyo warbaahinta degaanka ayaa laga yaabaa inay yimaadaan oo ay daawadaan.
- \* Soo dhig #NoLitterDay adiga barahaaga bulshada/ama ta dugsiya.

### ALAABAHA

- \* s. 109–116 ku yaala Globen.
- \* Filmka No Litter iyo filimka iyo 360-sawir ee laga soo qaadey Pakistan ee ku jira worldschildrensprize.org/nolitterpakistan.
- \* Xogta, si qoto dheer u dhexgalid iyo nuqulka Hadafyada caalamiga worldschildrensprize.org/globalgoals

\*16 maayo waa No Litter Day, laakiin waxaynu qashinka ka qaadi karnaa xili kasta todobaadkan.

# QIYAASTA QASHINKA

**Orod oo ardeyda** kale la samee qiyaasta qashinka.

Waxaanu u baahan nahay: Qalin iyo xadhig labba mitir ah. Waxa fiican in aad haysato galoofyada iyo/ama wax lagu qaado. Isla qaata noocyada qashinka aanay ardeydu soo guri karin sida, tusaale ahaan waxyaalaha khatarta.

1. Ardeyda u kala saar kooxo midba uu soo baadho qeybtiisa.
2. Koox kastaa waxa ay badhtamaha aageeda ku dhajinayaan ul iyago halkaana bac ku xidhaaya.
3. Kooxaha ayaa soo ururinaaya dhamaan qashinka ay helaan laga bilaabo usha ilaa laba mitir dhinac kasta, si goobo ah. Qashinka yaryar iyo ka waawayba waa in la qaadaa.
4. Marka dhamaan qashinka la soo guro ayay gaadhaysaa xiligii la xisaabinaayey oo la kala saaraayey. Go'aami sida aad wax u wada sameynaysaan, si ay dhammaan kooxuhu wax isku mid ah u sameeyaan. Tiri tusaale ahaan tirad haashka, bacaha wax lagu rito iyo baakeedada cabitaanka iyo cuntada. Ama u kala saar kadib alaabaha; biro, balastiga, warqada iwm.

## QASHINKA WAX KA SAMEE

Dabcan, waxa qashinka laga abuuri karaa waxyaalo qurux badan, mada-daalo leh oo waxtar leh. Isticmaal midabada iyo nashqadaha, dib u isticmaal, qurxinta iyo dib u adeegsiga!

Isticmaal qashinka ay ardeydu soo gurtey si aad uga sameeyso wax cusub, sabuurad wax lagu sawirey, taalo ama wax cusub oo aad abuurteen. Waxaa laga yaabaa inaad sameyn kartid farshaxan weyn, aad ku qortaan magaca dugsiga, qurxinta weelasha qashinka, ama aad sameysaan wargeysa ka sameysan waraaqaha? Khiyaaligaaga uun ha ku xadeeyo!

Ka bilow inaad u kala soocdo waxyaabaha aad heshay midab ahaan, sida jeegaan ama midabada safan.

Ka dibna ka samee sawiro naqshado leh, laga yaabo inuu yahay muuqaalka deegaanka ama sawir qof.

Ardeyda weydii inay ka fikiraan:

- Nooca qashinka ay heleen?
- Waxa uu yahay nooca qashinka ugu badan?
- Ayaad u maleynaysaan inay tuureen qashinka – miyaad arki kartaan meesha ay ka yimaadeen? Tusaale ahaan ma qashin ka yimid warshahadaa mise waxa uu ka yimid dadka? Carruurta ama dadka waaweyn?
- Isbarbardhig qaybaha kala duwan ee kooxaha. Ma waxa yaalay qashin kala duwan meelaha kala duduwan? Ma qashin ka badan ayaa yaalay meel gaar ah? Maxay markaa taasi ku xidhan tahay?

### TIROKOOBKA QASHINKA IYO QADARKA

Isticmaal natiijooyinka qiyaasta qashinka layliyada kala duduwan ee casharada xisaabta. Siday u kala adagtahay ku salee kolba aqoonta hore ee ardeyda.

Soo saar tirokoobka qashinka ee ku sabsan tusaale ahaan:


- Alaabaha kala duwan. Imisa ayaa

### MUDEYNTA

Qashinku marku uu dhulka galo miyuu iska baaba'ayaa kaligii haddii uu halkaa yaalo 1 sano ama laga yaabee 100 sano?

Isticmaal qashin ay ardayda soo ururiyeen oo/ama ka dalbo inay guriga qashin ka soo qaataan, si aad ugu heshaan wax isku dhafan oo ka sameysan dhalooyin ilaa balaastig, birta, wargeysyada iyo diirka khudrada.

1. Ku dheji xadhig dheer oo sida jadwal kale fasalka dhexdiisa ah, ama tamaashiir ku sawir barxada dugsiga. Calamadee wakhtiyo cayiman oo jadwalka ku jira, oo leh sanado iyo qarniyo.
2. U ogolow in ardeydu u shaqeyso wadajir, laba laba ama koox ahaan. Waa inay dhigaan qashinka waqtiga jadwalka, taas oo ku xiran inta ay



U ogolow ardeydu inay sameeyso shax iyo jaantuus goobo ah oo muujinaaya natiijooyinka qiyaasta qashinka.

laga sameeyey biro, balastig ama kartoon?


- Boqolkiiba imisa ayaa ahaa bacaha balastiga, qasaacda, bacaha nacnaca ama haashka?
- Nooc ayuu ahaa qashinka ugu badan? Kee ugu yaraa?
- Imisa nooc oo qashin ah ayuu fasalku soo helay?
- Imisa nooc oo qashin ah ayaa laga helay halkii m<sup>2</sup> ba?

### KEYDSO NATIJJADA!

Markaad mar labaad dib u sameysaan cabirka qashinka, sanadka soo socda ama xilliyada sanadka ee kala duwan, waxaad isbarbar dhigi kartaan oo aad tirin kartaan koboca boqolkiiba ama hoos u dhaca waqtiga.

u maleynayaan inay qaadanayso wax kasta inuu burburo oo aan dib dambe loo arki karin.

3. Fasalka la aad jedwelka meesha uu yaalo oo kala hadal. Miyey saxeen? Weydii arrimaha ku saabsan su'aalaha kala duwan, tusaale ahaan sida waxyaabaha keena inay qaarkood ay dhakhso u baaba'ayaan marka loo eego kuwa kale. Kala hadal sidoo kale tusaale ahaan in balastigu uu dhaawac keeni karro xataa haddii aan la arkeyn.
4. Kala hadal sida aan u sameyn karno si aan u badbaadino khayraadka dhulka oo aan u yareyno qadarka qashinka, iyadoo tusaale ahaan, wax ka badan dib u loo isticmaalaayo, dib loo cusbooneysiin iyo inaan sameyno doorashooyin ka maskax badan markaynu wax iibsaneeyso.



# ADIGA IYO HADAFYADA CAALAMIGA

**Qaramada Midoobay** ayaa hoggaamiyayaasha adduunku ay ku heshiiyeen in qof kastaa uu qeybto badan ka shaqeeyo sidii adduunka looga wanaajin lahaa. Waxay ku ballanqaadeen 17 hadaf oo caalami ah si loogu gaadho waxyaabo wanwanaagsan sanadka 2030, sida ciribtirka saboolnimada ba'an, yaraynta sinnaan la'aanta iyo cadaalada, iyo xalinta dhibaataada cimilada.

1. U sheeg hadafyada caalamiga ah ee horumarka waara. U sharax in hadafyadu cilaqaad leeyahay. Waa ay isa saameeyaan iyadoo ay adag tahay in la gaadho hal hadafa iyadoo aan mid kale la gaadhin. Haddii aynu awooda saarno inaynu mid gaadhno ayay adkaan kartaa in la gaadho mid kale. Waxa markaa muhiim ah in la arko sawirka guud.
2. U ogolow ardayda inay akhriyaan waxyaalaha ku saabsan qashinka iyo xashiishka waddamada hodanka ah iyo kuwa saboolka ah, iyo dadka deynta lagu adoonsado Pakistan ee Nisha iyo Sidra.
3. U ogolow in ardeydu u shaqeeyso laba laba ama koox ahaan. Waxay bilaabayaan inay eegaan su'aalaha ku saabsan mid ka mid ah hadafyada caalamiga ah iyagoo laga shidaal qaadanaayo xaaladda nololaha ee Nisha iyo Sidra.
4. Ardaydu ayaa sii soconaysa waxaanay sidoo kale baadhayaan sida ay hadafyada kale cilaqaad ula leeyihiin xaaladda gabdhaha iyo sida hadafku isku saameyn karro. Waxay sawiri karaan kaadh fikirka ama ay googeeyn karaan waraaqo si ay ugu muujiyaan isku xidhnaanshaha.


## Taageero

Isticmaal shax sal u ah shaqada. Waxa ku jira su'aalaha mid ka mida hadafka. Waxaad bogga-WCP kala soo daggi kartaa shax leh su'aalo dhamaan hadafyada oo dhan.

1 	<b>AANAY JIRIN FAQIIRNIMO</b> Sidee ayay Nisha iyo Sidra u saameynaysaa inay yihiin sabool iyo sida ay saboolnimadu u saameynayso maaraynta qashinka ama qadarka qashinka ee dhulka yaala? Waa maxay hadafyada kale ee caalamiga ee si dhibyar loo gaadhi karro haddii saboolnimada la dhimo? Sidee? ▶ Ku xidh tusaale ahaan Hadafka 3, 6, 10, 11, 12
3 	<b>CAAFIMAADKA IYO FAYO QABKA</b> Nisha iyo Sidra waxay degan yihiin bay'ad qashin leh. Sidee ayaad u maleyneysaa inay u saameynayso iyaga caafimaadkooda iyo fayo qabkooda, tusaale ahaan markay ciyaarayaan ama markay cuduradu ku faafayaan qashinka? Sidee ayaa caafimaadka bini aadamka u saameysaa/u saameeyaan hadafyada kale? ▶ Ku xidh tusaale ahaan Hadafka 1, 4, 5, 6, 10, 11
4 	<b>WAXBARASHO WANAAGSAN</b> Sidee ayuu dugsigu uga qeyb qaadan karaa in Nisha, Sidra iyo kuwa kale ee adduunka oo dhan la da'da ah iyaga ay u noqon lahaayeen <i>No Litter Generation</i> ? Maxaa muhiim ah in laga barto dugsiga si aynu ugu gaadhno hadafka caalamiga ah ee 2030? ▶ Ku xidh tusaale ahaan Hadafka 1, 3, 5, 6, 10
5 	<b>SINAANTA</b> Nisha iyo Sidra waxay wax ka bartaan xuquuqda sinaanta gabdhaha iyadoo la marayo World's Children's Prize oo lala halgan galaayo <i>No Litter Generation</i> si loogu helo degaan ka nadiifsan oo ka caafimaad badan. Sidee ayaa sinaanta kor loo qaadey ay uga qeyb qaadan kartaa tusaale ahaan bulshada ka nabada badan, dhimista saboolnimada iyo qubista qashinka? ▶ Ku xidh tusaale ahaan Hadafka 3, 4, 6, 10, 16
6 	<b>BIYO NADIIF AH IYO FAYODHOWRKA</b> Sidee ayay qashinka qubista iyo maareynta qashinka ee xun u saameynaysaa xaquuqda in la helo biyaha nadiifinta iyo fayodhowrka? Sidee ayay hablaha Nisha iyo Sidra u heli karaan aqoon ka badan oo ku sabsan khataraha tusaale ahaan biyaha wasakhda? ▶ Ku xidh tusaale ahaan Hadafka 1, 3, 4, 5, 8, 10, 12
8 	<b>XAALADAHAA NOLOLSHA EE WANAAGSAN IYO KOBACA DHAQAALAHAA</b> Maxaa looga jeedaa xaaladaha nololaha ee wanaagsan? Miyey Nisha iyo Sidra haystaan xaalada nololeed oo wanaagsan? Sidee ayaa wax looga hagaajin karaa? Miyaad u maleyneysaa inay dadka meesha ay ku nool yihiin si ka yar qashinka ugu daadin lahaayeen haddii ay xaalado nololeed oo wanaagsan haysan lahaayeen? ▶ Ku xidh tusaale ahaan Hadafka 1, 3, 4, 5, 6, 10
10 	<b>DHIMISTA SINAAN LA'AANTA</b> Nololaha Nisha iyo Sidras waxay muujinaysaa sida fursadaha kala duduwan ay carruurta dunidu u haysan karto. Iyo in wadamada saboolka ay ku adkaan karto inay maareeyaan qashinka iyo xashiishka. Marmarka qaar ayay xataa maareeyaan wadamada qaniga ah qashin-kooda khatarta. Sidee ayaa wax looga badeli karaa? ▶ Ku xidh tusaale ahaan Hadafka 1, 4, 5, 11, 12
11 	<b>MAGAALOYINKA IYO BULSHOYINKA WAARA</b> Nisha iyo Sidra waxay degan yihiin cidhifka magaalo weyn. Sanadka 2030 ayaa 6 qofba 10 ay dadka magaalo ku noolaan doonaan. Qaar badan ayaa lagu qasbey inay miyiga ka soo guuraan saboolnimo darteed. Sidee ayay magaalooyinku u noqon doonaan qaar ka sii waara? ▶ Ku xidh tusaale ahaan Hadafka 1, 4, 5, 8, 12, 13, 14, 15
12 	<b>ISTICMAAL IYO WAX SOO SAAR WAARA</b> Isticmaalka iyo wax soo saarka alaabada badanaa waxay leeyihiin saameyn weyn oo bay'ada ah waxayna u horseedi kartaa kobaca qashin qubista. Waa maxay faraaqo jiraa ee u dhaxeeya hababka isticmaalka iyo wax soo saarka qaybaha kala duwan ee adduunku? Waayo? Miyaa adiga isticmaalkaagu saameynayaa waxsoosaarka warshada? ▶ Ku xidh tusaale ahaan Hadafka 4, 8, 11, 13, 16
13 	<b>LA DAGAALAN ISBEDELKA CIMILADA</b> Hab nololeedkeena iyo isticmaalka tamarta ayaa saameeya cimilada. Miyaad adiga, Nisha iyo Sidra siyaabo kala duwan u saameysaan? Miyaa wadamada kala duwan leeyihiin saameyn kala weyn oo cimilada? Maxaad adigu ama dugsigaagu sameyn kartaan si aad uga qeyb qaadataan in hadafka la gaadho? ▶ Ku xidh tusaale ahaan Hadafka 1, 6, 7, 11, 12
14 	<b>KHAYRAADKA BADA</b> Qayb wayn oo qashinka ah ayaan ugu dambayntii ku dhacda badda, waana u halis waxkasta oo ku nool halkaas. Maxaad sameyn kartaa si aad u dhinto qadarka qashinka ee ku dhacaaya badda. Habkee kale ayaa bay'ada bada u saameeyaan dadku? ▶ Ku xidh tusaale ahaan Hadafka 6, 8, 12, 15

# KALA SAAR, MIISAAN & SOO WARGALI

Maallinta No Litter Day waa in la soo guro qashinka, la kala saaro oo la miisaamo dhamaan. Kadibna ka soo wargali natiijada World's Children's Prize, si aanu ugu xisaabino inta tan ee qashinka ay carruurta *No Litter Generation* ay wadajir usoo wada gureen. Ku wargali qofka lagala xidhidh-WCP ee wadankaaga ama bogga: [worldschildrensprize.org/nolittergeneration](http://worldschildrensprize.org/nolittergeneration)




## SOO WARGALI WADARTA MIISAANKA

Waxaanu soo gurney \_\_\_\_\_ kg oo qashin ah.

### IKHTIYAARI!

Fadlan ku buuxi tirada qashinka kala duduwan ee aad hesheen.

		TIRADA		TIRADA
<b>Dhalooyinka PET-ga</b>			<b>Baanteedada cuntada lagu riddo</b>	
<b>Bacaha balastiga</b>			<b>Quraadadaha iyo dhalooyinka</b>	
<b>Qasaacdaha</b>			<b>Daasadaha alamuuniyamka</b>	
<b>Haashka</b>				



Wada shaqeyn ka dhaxeysa



KEEP SWEDEN TIDY



Iyadoo tageero laga haysto

